


## Cardiomyopathy– Dilated Xanuun Wadne oo Lagu Dhasho- oo Bararsan



Ogeysiis:

The Children's Heart Clinic 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404  
612-813-8800 \* Toll Free: 1-800-938-0301 \* Fax: 612-813-8825  
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

---

## **Xanuun Wadne oo Lagu Dhasho oo Barar Wata** Dilated Cardiomyopathy

Xanuun ah wadnaha oo bararsan waa wax ku dhaca muruqa wadnaha. Barar ah afarta qalbac ee wadnaha (laba kore iyo laba hoose) ayaa sabab u ah in ay daciifto shaqada wadnaha. Xanuunkan waa nooca ugu badan ee wadnaha iyo sababta ugu badan ee xanuunka ah marka uu dhiiggu si sax ah u soo bixi waayo ee dadka aan qabin cillado wadne oo kale oo la ogyahay. Iyada oo ay taasi jirto, dhacdooyinka ah xanuunka wadnaha ee ah bararka waa mid hooseeya, waxa uu ku dhacda 6 ilaa 8 qof oo ka mid ah 100,000 oo qof. Qiyaastii 50% ah dadka qaba xanuunka wadnaha ee bararka sababtooda lama garanayo (waxaan la garaneyn). Infakshan faayrus ah ayaa keeni kara xanuunka wadnaha bararsan.

### **Wiisiteynta/Calaamadaha Jirka:**

- Daal, daciifnimo
- Neefsasho dhib ah (neefsashada oo adkaata).
- Wadnaha oo dhiigga soo saari waaya: garaacis boobsiis ah (garaaca wadnaha oo degdeg ah ), boodboodista xididdada wadnaha ka fog oo daciifa, xididdada qoorta oo qallafsanaada, beer-barar (beerka oo weynaada), sambabada dil-dillaac yeeasha.
- Guux: S3 ayaa caam ah iyada oo ay jirto ama aysan jirin in wadnuhu garaacayo. Soobixista jilicsan ee guuxa dhiigga kore ayaa laga maqli karaa meelaha hoose ee xabadka bidixe sababtoo ah waxaa xumaaday murqaha daboolka ah.

### **Cilladsheegid:**

- Raajada Xabadka: Guud ahaan wadne-barar (wadnaha oo weynaada). Barar ah sambabbada ayaa jiri kara.
- EKG: Garaacis boobsiis (garaacista wadnaha oo degdeg ah ), left ventricular hypertrophy (qalbacada bidixe oo unugyadiisu weynaadaan ama LVH) iyo ST-T oo isbeddela ayaa caadi ah. Weynaan ah qalbacada bidix iyo midig iyo/ama shaqada qalbacada kore iyo hoose in ay jiraan.
- Uultarasawanka wadnaha: Cilladsheegid. Waxaa lagu oganayaa shaqada liidata iyo weynaanta qalbacada wadnaha. Xinjir sameysmata (xinjirow) ayaa la arkii karaa sababtuna waa shaqada xun iyo bararka.
- Baaritaanka hidderaaca

### **Maareynta/Daaweynta Caafimaadka:**

- Daawooyinka biyaha jirka ka saara (Lasix) ayaa yareyn karaa culeyska (enalapril, captopril) si loo daaweeyo calaamadaha xanuunka wadnaha.
- Nasasho ah sariirta ama joojinta dhaqdhaqaaqa sababtoo ah shaqada wadnaha ayaa xun.
- Daawada xinjirowga, sida aspirin, ayaa looga hortagayaa ama lagu daaweynayaa xinjirowga.
- Daawooyinka garaacista wadnaha ayaa lagu daaweeyaa garaaca khaldan, haddii ay jirto.
- Daawada joojisa (carvedilol) ayaa loo qaataa si loogu hagaajiyo shaqada qalbacada bidixda hoose.
- Taageero ah faleebaha Inotropic IV iyo farsamo ayaa loogu baahan karaa xanuunka daran.
- Wadnaha oo la beddela ayaa loo baahan karaa haddii ay daaweyntu ku filnaan weydo.
- La-socosho ah daaweynta wadnaha ayaa loo baahan karaa. Haddii ay tahay in wadnaha la beddela, waxaa la socon doonta kooxda wadnaha xumaada/beddelka.

### **Natiijooyinka Mustaqbalka-fog:**

- Garaacista xumaata ee qalbacada waa ay dhacdaa, balse daawo ayaa lagu maareyn karaa.
- Walax dhiigga raacda (walax soconeyna) oo ah xinjirow gasha jirka ama sambabka ayaa dhici kara.